



## Modified Norwood Procedure Qalliinka Norwood Beddelan




© 2012 The Children's Heart Clinic

Ogeysiis:




The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* East Metro: 651-220-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

## Modified Norwood Procedure Qalliinka Norwood Beddelan




© 2012 The Children's Heart Clinic

Ogeysiis:




The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* East Metro: 651-220-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

## Modified Norwood Procedure Qalliinka Norwood Beddelan



© 2012 The Children's Heart Clinic

Ogeysiis:



The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* East Metro: 651-220-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

## Qalliinka Norwood Beddelan Modified Norwood Procedure

Qalliinka Norwood waa qalliinka ugu horreeya (saddex) loogu talagalay xanuun yareynta hal qalbac ee hypoplastic left heart syndrome (cilladda unugweynaadka bidix ee wadnaha) (eeg HLHS) iyo waxyaabaha la xiriira. Qalliinkan waxaa loo sameeyaa si cusub loogu sameynayo, “halfowle cusub” oo ku filan si uu dhiigga ugu qaado jirka, iyadoo la sii marsiinayo meelo la isku halleyn karo oo noqda qulqulka dhiigga sambabka si loo joogteeyo ogsajiinta jirka ku filan. Qalliinkan waxaa badanaa la sameeyaa toddobaadka ugu horreeya ee nololka ilmaha.

Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Tuubada Gore-tex® (Gore) waxaa lagu tolayaa halfowlaha jirrida ah (eeg qalliinka beddelin ee Blalock-Taussig). Waxaa ilmaha lagu xirayaa wadne iyo sambab ah macmal (mashiin ah wadne-sambab). Patent ductus arteriosus (Xididka dheeraadka ah ama PDA) ayaa la isku qodbayaa oo la kala qeybinayaa. Halfowlaha weyn ee sambabka ayaa kala-qeybsan. Furitaanka ka soo baxa qeybta halfowleyaasha sambabada ayaa dusha laga tolayaa. Qeybta kore ee midig ayaa la furay oo waxaa la sameynayaa darbi-soosaarid (in la soo bixiyo darbiga udhexeeya labada qeybood ee sare ee wadnaha). Waxaa markaas lagu xirayaa qalabka mashiinka maskaxda. Waa nooc ah mashiinka dhiigga ku dhex wareejinaya tuubada Gore-tex® (Gore) iyo halfowlaha jirrida ah si loo siiyo dhiig ogsijiin leh madaxa inta lagu jiro sameyta “halfowlaha cusub” ama dibudhiska halfowlaha buudada ah. Mararka qaarkood, xididada dheeraad ah ayaa lagu sameynayaa halfowlaha weyn ee hoos u gaaraya jirka oo dhan (meelo badan). Halfowlaha weyn ayaa markaas laga goynayaa hawlaha weyn ee kow u socda ilaa iyo meesha PDA. Dhuunta unugyada xuubkeeda oo dhan ayaa la soo saarayaa. Darbiyada ku xiga ee halfowlaha kor u socda iyo kan hoos u socda ayaa la isugu tolayaa wadajir ahaan, oo waxaa la sameynayaa darbiga dambe ee halfowlaha weyn. Halfowlaha sambabka ayaa markaas lagu tolayaa meesha laga jeexay halfowlaha, wax yar meel ka sarreeya heerka halfowleyaasha xawlmariidka. Sharootada lagu dhejinayo sambabka (halfowlaha sambabka) ayaa laga soo goynayaa in le’eg waxaa lagu tolayaa “halfowlaha cusub”. Marka la dhammeeyo, waxaa la bilaabayaa mashiin ah wadne-sambabka.

Haddii qalliinka Norwood uu keeno tuubada beddelan Blalock-Taussig si uu u socdo dhiigga sambabka, tuubada Gore-tex® (Gore) ee la isticmaalayo qalabka mashiinka maskaxda ayaa markaas lagu tolayaa meesha laga jeexay halfowlaha sambabka midig. Haddii qalliinka Norwood ku keeno halfowlaha midig ilaa marinka halfowlaha sambabka oo u ah isha qulqulka dhiigga sambabka (oo loo yiraahdo wax ka beddelka Sano ee qalliinka Norwood), tuubada Gore-tex® (Gore) ayaa lagu tolaa meeshii laga jeexay halfowlaha sambabka oo daraf kale ayaa lagu tolaa dalool laga sameeyay qalbaca midig hoose. Marka la dhammeeyo, ilmaha waxaa laga goynayaa mashiinka wadne-sambabka ah. Qalliinka xabadka waxa uu u sii furnaanayaa si caadi ah, oo meeshii xabadka laga jeexay waxaa lagu daboolayaa in yar oo ah Gore-tex® (Gore) ama wax la mid ah. Xabadka waxa la isku xirayaa 1 ilaa 3 maalmood gudahood ee qalliinka ka dib (waa hab la yiraahdo daahinta xiritaanka xabadka).

### **Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 5 ilaa 6 saac
- Leymanka Caadiga: Carruurta intooda badan waxay ku noqon doonaan Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka iyaga oo ku tuubbo ah neefsashada, mid halfowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, iyo kateeraha Foley oo ah kan kaadidu geleysa.
- Sookabashada Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib: Waxaa wax caadi ah in ay dhallaanku xoogaa “bararaan” ka dib qalitaanka badan ee adag. Xiritaanka xabadka waxaa la sameynayaa marka bukaanku u dhow yahay culeyskii iyo heerkii cabitaanka ee qalliinka ka hor. Tuubada neefsashada waxaa badanaa looga saarayaa dhowr maalmood gudahood ka dib xiritaanka xabadka. Tuubada halfowlaha badanaa waa la gooyaa marka la baxiyo tuubada neefsashada oo inta badan daawooyinka faleebbaha waa la joojinayo. Markaas tuubada xididdada bartamaha waxaa badanaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn daawo awgeed iyo dhiig in laga qaado. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, marka uu yaraado dheecaanka soo baxaya. Wax yar ka dib qalliinka, ilmaha waxaa la siinayaa heparin si looga hortago xinjirowga tuubbada. Marka bukaanku wax cunayoo, waxaa loo qorayaa aspirin oo waxaa laga joojinayaa heparin. Aspirin waa in loogu sii wado guriga ilaa la gaaro wakhtiga xiga ee qalitaanka wadnaha.
- Wakhtiga Joogitaanka Caadiga ah: Celceliska joogitaanka isbitaalka ee ka dib qalliinka Norwood qiyaastii waa 2 ilaa 4 toddobaad. Wakhtiga joogitaanka waxa uu ku xiran tahay ilaa inta dhallaanku baranayo in uu wax cuno. Waxa ay ilmuhu joogaan dhowr toddobaad si ay u bartaan cuntada qalliinka ka dib.

---

## **Qalliinka Norwood Beddelan** Modified Norwood Procedure

**Qaashada Daawoyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib qalliinka Norwood sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin, Lovenox) looga hortago xinjirowga
- Walax dhimeysa culeyska oo wadnaha looga yareeyo hawsha (Enalapril, Captopril)